



San Diego Unified School District

WAXAA WAALIDIINTA, DADKA ARDEYDA MASUULKA KA AH, MACALLIMIINTA IYO ARDEYDA LA XUSUUSINEYAA

WARBIXIN DHEERAAD AH OO KU SAABSAN QALABKA WAX LAGU DHIGO, QALABKA DUGSIYADA IYO SHAQOYINKA MACALLIMIINTA

Sharciga dawlad-goboleedku wuxuu dhigeyaa waxyaabaha hoos ku qoran:

1. Waa inay jiraan buugaag iyo qalabka wax lagu dhigo oo ku filan. Ardey kasta, oo ay ku jiraan kuwa af Ingiriisiga baraneya waa inay haystaan buugta wax laga barto iyo qalabka wax lagu barto, ama labadaba, si ay ugu isticmaalaan fasalka dhexdiisa ama guriga ugu qaataan.
2. Qalabka dugsiya waa inay nadiif yihiin, badbaado qabaan, isla mar ahaantaasna, si wanaagsan loo dayactiraa.
3. Waa in aysan jirin boos macallinimo oo bannaan. Waa in macallin lagu qoraa fasal kasta, oo aysan jirin macallin aan joogto ahayn ama kuwo ku-meel-gaadh ah si isdaba-joog ah fasalada loogu qoro. Macallinku waa inuu haystaa shahaadada aqoonsiga macallinimada si uu fasalka u dhigo, taas oo ay ku jirto shahaadada looga baahan yahay inuu af Ingiriisiga dhigo haddii ay fasalkaas ku jiraan ardey af Ingiriisiga baraneysa.

Jagada bannaan ee macallinka waxaa weeye jago hal qof oo keliya oo shaqaale shahaado leh loo magacaabi lahaa ayaan cidna lagu qorin bilowgii sannad-dugsiyeedka oo dhan ama, haddii jaga loogu talagalay hal-xilli-dugsiyeed, waa jago hal qof oo keliya oo shaqaale shahaado leh aan loo magacaaabin bilowga xilli-dugsiyeedka iyo xilli-dugsiyeedkii oo dhan.

Meeleynta aan habbooneyn macnaheedu waxaa weeyaan marka qof shaqaale ah oo shahaado haysta lagu meeleyo boos uusan sharciyan shahaadadiisa ama aqoonsi kale u haysanin ama meeleynta qof shahaado leh meel kale lagu meeleyo macallinimo ama adeegyada kale taas oo aan sharciga shaqaaleynta waafaqsaneyn.

4. Ardeyda aan ku gudbin mid ama labada qeybood ee imtixaanka looga qalin jebineyo dugsiyada sare dhammadka fasalka 12aad waxay xaq u yeelanayaan in ay helaan waxbarasho la dedejineyo iyo adeegyo dheeraad ah muddo laba sannad-dugsiyeed oo isku xigta ah kedib marka ay fasalka 12aad dhammeeyaan, ama inta uu ardeygu ku gudbeyo laba qeybood ee imtixaanka, hadba kii soo horeeya.

Haddii aad is leedahay shuruudahaas lama buuxinin, waxaad Foomka Cabashada Isku mid ahaanshaha ka heli kartaa xafiiska dugsiya ama Xafiiska Qareenka Guud ee Waxbarashadda Degmada (Office of General Counsel) oo ku yaala 4100 Normal Street, Room 2148, San Diego, CA 92103. Waxaad kale oo aad nuqulkaas kala soo bixi kartaa foomka cabashada ee Waaxda Waxbarashadda ee California oo shabakadeeda Internetku tahay: <http://www.cde.ca.gov/re/cp/uc/>.

Waxaa la naqtimey mid kasta AB 347 Janaayo 2008